

Waalidku xataa Wuu Tiriya

Ka caawi ilmahaaga – Xisaabta: *Isku darka, kalgoynta, Isku dhufashada iyo Qaybinta*

Marka la eego dhacdooyinka maalinkasta iyo xaaladaha ciyaaraha, caruurtu si dabiiciya ayey u is ticmaalaayaan lambarada. Carruurta yar yari aad ayey u garankaraan wadaaga sida nacnaca sidaa awgeed mid kasta wuxuu haystaa saami isleeg ama ku darayaa saaxiibkii/tiis ku-wiisa/weeda markaana raadinayaa wadartooda. Waxaan u baahan nahay in aan helo jid fudud oo carruurtu si dhaqso ay u isticmaalaan lambarada.



Sidee carruurtu u barataa isticmaalka lambarada?


Marka u horaysa ee ay baranayaan lambarada carruurtu waxay ubaahan yihiin in ay haystaan shayyaal si ay isugu daraan, u kala jaraan, isugu dhuftaan, ama u qaybiyaan si isle'eg. Waxay marayaan dariiqo ay u baahan yihiin in ay arkaan isla markaana tiriyaan ashyaada midkasta mar gooniya.

Waxaan u baahan nahay in aan ka caawino carruurta in ay bartaan sidii ay ubilaabi lahaayeen xisaabinta iyadoo laga bilaabay lambar badan isla markaana lagu darayo ama laga jarayo lanbur kale. Waxaan kale oo u baahanahay in aan carruurta ka caawino sidii ay maskaxda ugu dhisi lahaayeen humaagyada koox ama tiro sidaa awgeed ayna had iyo jeer ku tiirsanaan in ay arkaan shayga. Caawinta carruurta maskaxiyan “arag” koox shayyaal ah waxay ka caawinaysaa in ay fahmaan isku dhufashada iyo qaybinta

Waalidku xataa Wuu Tiriyaan

Maxaad Guriga ka Qaban kartaa?

- Boodhadhka cayaaraha lagu ciyaaro sida *ruxmadaha iyo jarjanjarooyinka* ooy lasocdaan laba laf laadhuu iyo in aad ku taageertid ilmahaaga in uu isku daro labo nambar. Wuxaan tustaa sida loo tiriyo iyadoo laga bilaabayo lambar weyn.
- Kaadhadhka lagu ciyaaro cayaarahasida 21 ama bust. Ciyaartan, ciyaar yahan kasta wuxuu leeyahay labo kaadh oo uu isku darayo nambaradooda. Ciyaar yahan kasta wuxuu waydiisan karaa kaadhadh dheeraada “kitty” iyadoo qofna aanu dhaafi Karin buundada ugu saraysa oo ah 21.
- La wadaag carruurtaada midhaha sida Mandarinka iskuna dara lambarada pipska aad haysataan.
- Wuxaan waydiisaa ilmahaaga in uu ku caawiyo, markaad suuqa ka adeegaysid adigoo waydiinaya waxaad u baahnaydeen in aad iibsataan, sida, halkan *waxaan ku haystaa lix xabo oo tufaax ah, si ay u noqdaan tobantimisa ayaan ku daraa?*



- Fiiri lambarada guryaha markaad lugaynaysaan. Dabadeedna waydii ilmaha in uu sheego namburka ku xiga waxa uu noqonayo.
- Halqof u dhig miiska saxan dabadeedna waydii ilmahaaga in uu qofwalba u dhigo suxuun ku filan. Wuxaan waydiisaa imisa dheeriya ayaa loo baah naa.
- La Tiri ilmahaaga tirada ukun ku jirta kartoon, dabdeedna qaarka saar. Waydii ilmahaaga, *imisa ayaa laga bixiyey?*
- U akhri ilmahaaga buug leh bog horudhac ah. Raadi sheeko ama cutub ku yaal bog dabadeedna raadi imisa bog ayaa hadhay ilaalaga gaadhayo sheekada ku xigta.

Waalidku xataa Wuu Tiriyaan

- Wuxaad is ticmaashaa duub waraaqaha musquusha ah iyo dhalooyinka caaga ah oo madhan iyo kubad si aad u samayso ciyaarta skittles ah. Ku dhiiri geli ilmahaaga in uu kuu sheego inta la riday iyo inta weli taagan ka dib markii kubada la giraan giriyeey.
- Ku hees, hees ayku jiraan tirooyin ama lambaro. Waydii ilmahaaga in uu kuu sheego lambarka ku xiga heesta intaadan ku heesin sadarka ku xiga.
- Ku kaxee baabuurka, u tilmaan calaamadaha kuu sheegaya fogaanshaha ay jirto magaalada idinka horaysa. Marka lajoogo fooraayaasha(duleedka) magaalada calaamadaha kuu sheegaya fogaanshaha magaaladu jirto shan (5) ayey hoos u dhacaan. Waydii ilmahaaga in uu kuu sheego lambarka ku qoraan doona calaamada ku xigta.
- Haku caawiyo ilmahaagu markaad reerka cuntada u qaybinaysid. Sida, *Imisa qaybood ayaan u baahanahay in aan u jarjaro biisada si qofkastaa u helo labo?*
- Waydii ilmahaaga in uu laqaybsado shay yaasha si isle'eg ilmayaasha kale.
- Tiri tirada ashyaada ku jirta kolay sida xaaxeyada ama baaquli balaadhan oo ay ku jiraan badhamo. Waydii ilmahaaga haddii ay jirto si fudud oo dhaqso badan oo loo jiri karo, sida, shan shan.
- Wuxaad qurxisaa keega xafalada adigoo isticmaalaya sultanas ama smarties. Wuxaad keekasta saartaa lambar isku mida oo ah sultanas ama smarties babadeedna waydii ilmahaaga guud ahaan intaad u baahan tahay.
- Wuxaad tirisaa tirada barafka ah ee ku jirta tareydh. Haddii ilmahaagu u tiriyo mid mid, usoo jeedi in uu tiriyo inta saf ee tareydhka su jirta.(sida caadiga ah waxaa loo tiriyaan labo labo)

